SOOMAALIYA

Warbixin Degdeg ah/ Saamaynta Fatahaadaha #4

11 Maajo 2020

Xaaladda Guud

Tirada dadka ay saameeyeen fatahaadaha ee Soomaaliya ayaa kor u dhaaftahay 546,103 oo qof kuwaas oo 216,895 qof oo ka mid ah ay ka soo barakaceen guryahooda sidoo kale 16 oo qof ayaa ku dhintay tan iyo markii roobabkii Gu'ga ay biloowdeen horaantii bishii Abriil. Ugu yaraan 27 degmo ayaa daadadku si xun u sameeyeen oo ay ugu darantahaymagaalad Beledweyne ee gobolka Hiiraan, halkaas oo 115,000 oo qof ay ka barakaceen fatahaada wabiga shabelle sida lagu sheegahay warbixinta gudiga fatahaadaha ee goblka. Warbixinta ayaa waxaa kamid ah in ilaa 91,000 oo qof ay ka soo barakaceen afarta qaybood ee magaalada, waxaa intasi dheer 23,220 qof oo kale oo ka barakacay 23 tuulo oo wabiga ku dhaw. Fatahaada oo ka dhashay kadib roobab culus oo ka da'ay soomaaliya gaar ahaan gobollada ay maraan wabiyada iyo buuraleyda itoobiya ayaa sababtay in wabiga biyahiisa saro u kacaan. Sida laga soo xigtahay howl wadeenada, dad badan ayaa ka cararay guryahooda iyadoo heerarka biyaha ee wabiga uu sare u kacayo. Laga soo bilaabo 10 Maajo, heerarka biya wabiga waxaay gaareen 7.93 mitir, cabirkan oo 0.37 mitir ka hooseeya heerka fatahaadda webiga oo ah 8.30 mitir.



Xaafadaha hoose ee magaalada Beleddweyne sida Xawo-tako, Kooshin ayaa fatahaaduhu si ba'an saameyn ugu yeesheen. Sidoo kale, xaafadaha laabka, Shaah-macaan, Dhagax-jibis, Dhuurta iyo Kutiimbo ayaa inta badan dadkii degganaa ka barakaceen. Sida ay ku soo waramayaan kooxda gurmadka, dadka intiisa badan waxay u guurayaan dhulka sare ee ku dhow xaafadaha Hiiraan Bile, Ceel Jaale iyo Faaf gumare. In kast oo la saadaalinaayay in dad badani u guuraan Ceel Jaale A iyo B, halkaso sanadkii 2019 a dad badan ku barakaceen, hadda waxaa jirto cabsi laga qabo faafinta cudurka cusub ee coronavirus kasoo hadda ay sareeyso khatartiisa ee meelaha dadku ku badanyihiin. Waxaa jira walaac laga qabo in daadadku sidoo kale ay sababi karaan cudurrada laga qaado biyaha wasaqeysan sida shuban biyoodka ama daacuunka.

Qarka webiga oo go'an, magaalada Jowhar

Degmada Jowhar, guddiga fatahaadaha ayaa qiyaasaya in tiro kabadan 17,300 oo qof ay saameyn ku yeesheen fatahaadaha webiga iyo daadadka ka dhacahay 12 tuulo. Wararka ayaa sheegaya in guryahay iyo beeraha ku dhow afaafka webiga ay waxyeeloobeen, waxyeello xoog leh ayaa soo gaartay dalagii. Saadaasha usbuuca soo socda ayaa muujineysa roobab badan oo ka di'I doona gobollada koonfurta iyo sidoo kale buuraleyda Itoobiya. Roobab intaa ka badan ayaa laga filayaa webiyada Jubba iyo Shabeelle, halka ay wax yar hoos u dhici doonaan gobollada waqooyiga. Khatar fatahaadda laga qabowaxay u eg tahay inay sii socon doonto ilaa bartamaha bisha Maajo, taasoo khatar

galineysa dadka ku nool magaalooyinka webiyadu maraan iyo xaafadaha hooseeya. Xaaladaha Shuban-biyoodka iyo daacuunka ayay u badan tahay inay kordhaan., 90 xaaladood oo Shuban biyood ba'an ah ayaa laga soo sheegey Doolow, Jubaland 9kii Maajo.

Roobabku waxay sii xoogeysteen waqti ay Soomaaliya xaqiijisay in ka badan 1,000 xaaladood oo COVID-19 ah isla markaana ay kala shaqeyneyso hay'adaha sidii loo xakameyn lahaa faafitaanka cudurka. dalka wuxuu kaloo wajahayaa ayaxii ugu darnaa muddo 25 sano ahiyadoo ay jiraan wax yeelo cusub oo laga soo sheegay mamulada Somaliland, Puntland iyo Galmudug. Iyadoo ay jiraan mashaqooyinkaas, hadana waxaa jiro in howlaha gargaarka ee Soomaaliya aysan helin deeqdii ay u baahnaayeen. Ilaa 10ka Maajo, Qorshaha HRP 2020 ee Soomaaliya (HRP) ayaa helay kaliya 16 boqolkiiba laga deeqdii loo baahnaa

Saameynta roobabka culus, daadadka iyo baahiyaha ka jiro goobaha ay daadadku ku dhufteen

Marka laga reebo barakac baahsan iyo dhimashada la soo sheegay, roobabka culus iyo heerarka daadadku waxay waxyeeleeyeen kaabayaasha, guryihii iyo dhul beereed, waxayna sare u qaaday halista Shuban-biyoodka iyo daacuunka.

Somaliland: Sida laga soo xigtay Wasaaradda Horumarinta Beeraha ee Somaliland, marka la barbar dhigo celcelis ahaan sanadkii hore, roobabka bishii Abriil aad ayey u sareeyeen meelaha qaar oo ay ka mid yihiin Beer (237 mm), Ga'anlibah (197 mm) iyo Burco (145) mm); iyo sidoo kale Geeddeeble (360 mm) ee Woqooyi Galbeed. Inta badan gobollada kale ee Somaliland ayaa ilaa hadda helay roobab dhexdhexaad ah.

Puntland: Maamulka Puntland ayaa ku qiyaasay in $ 40 milyan oo doolarka Mareykanka ah loo baahan yahay si loo taageero wax ka qabashada arrimaha bini'aadanimo loona hagaajiyo magaalada Qardho halkaas oo daadadkii 27kii Abriil ay ku dhinteen sideed qof, halka in kabadan 22,000 ay ku barakaceen, waxayna saameyn ku yeelatay 48,000 oo kale. Sidoo kale afar ceel biyood oo magaalada siiya biyo ayaa waxyeelo soo gaartay. Wadada u dhaxaysa Qardho iyo Boosaaso ayaa burbur ku yimid 28-kii iyo 30-kii Abriil kadib roobab mahiigaan ah oo da'ay, taas oo carqaladeysey isu socodka gaadiidka. ka timaada Boosaaso ayaa loo isticmaalaa isu gudbinta shixnadhaa ganacsi ee u kala goosha Puntland gudaheeda, Galmudug iyo weliba qaybo ka mid ah Hirshabelle. Marka dhinckale loo fiiriyo, roobabku waxaydib u soo nooleeyeen daaqii iyo biyihii

Qoosas ku barakacay daadadka Beledweyn. Sawirka: OCHA

Galmudug: Gudigadaadadka ee Galmudug ayaa ku qiyaasey in 12,000 oo qof ay ku barakaceen daadad ka dhacay Bacadweyne, degmada Hobyo, kadib roobab mahiigaan ah oo da'ay 2 Maajo. Laba wiil ayaa ku dhintay, 25 kalena waa ku dhawacmeen. Intaa waxaa dheer, 133 ari ayaa ku naf waayay roobabka, qiyaastii boqolkiiba 80 dukaamada ayaa ku waxyeeloobay. Koonfurta Gaalkacyo, daadad ayaa barakiciyay qiyaastii 6,840 barakacayaal ah. Dhuusamareeb, biriq ayaa dishay afar carruur ah, waxaana kuku barakacay 2,400 oo qof tuulada Waxaracade. Hay'adaha ayaa soo sheegaya in barakacayaashu ay u baahan yihiin hoy iyo agabyo kale.

***Hirshabelle*:** Ilaa 10 Maajo, in kabadan 115,000 oo qof oo ku noolaa Magaalada Balad Weyne-kalabar tirada guud dadka ku nool magaalada oo ah 232,000- ayaa ka barakacay guryahooda. Barakac kale ayaa laga filayaa tuulooyinka iyo magaalooyinka ku teedsan webiga Shabeelle maadaama heerarka wabigu uu weli sii kordhayo. Kooxaha ka hortaga daadka ee degmada Beled Weyne ayaa cadeeyay baahiyaha iyo mudnaanta koowaad ee dadka ay saameeyeen fatahaada ay ka mid yihiin biyo nadiif ah oo la cabo, musqulo, cuno, caafimaad iyo nafaqo, hoyga / agabka aan cuntada ahayn, ilaalinta amniga. Xubnaha guddiga ayaa xiriir la sameeyay gudiyada maareynta si ay macluumaadka ula wadaagaan.

***Koonfur Galbeed**:* 5tii Maajo, kanaal biyood ku yaal tuulada Golweyne ee degmada Marka ee shabeelaha Hoose ayaa fatahay. Qiyaastii 20,000 oo qof ayaa dhibaatadu saameysay oo u baahan hoy degdeg ah, agabyo, biyaha iyo

fayadhowrka iyo maro kaneeco. WFP waxay soo sheegtay in gawaarida sahayda ee raashinka u keenta gobollada Baay, Bakool iyo Gedo ay ku xayiran yihiin magaalada Baydhabo iyaga oo sugaya in roobabku yaraadaan oo wadooyinku furmaan. Magaalada Baydhabo, badeecadaha cuntada ee muhiimka ah sida bariiska, sonkorta iyo saliida ayaa dhammaaday, sida la sheegay waxaana xayiran baabuurta shixnadaha ganacsiga ka keena Muqdisho, gawaaridan waxay ku xayiran yihiin magaalada Yaaqbariweyne (140 km Baydhabo). Qiimaha cunada ayaa sidoo kale kor usii kacaya gobollada Baay iyo Bakool sababtoo ah wadooyinka oo burbursan. Ilaa hada, dad lagu qiyaasay 134,00 qof ayey saameeyeen fatahaadaha ka jira Koonfur Galbeed oo ay ku jiraan 50,000 oo qof oo ku nool gobolka Shabeelaha Hoose iyo 83,000 oo qof oo ku nool gobolka Baay.

Jubaland: Webiga Dawa ayaa ku fatahay 600 oo beero ku teedsan dhul daaqsimeedka u dhexeeya degmooyinka Doolow iyo Beled Xaawo ee gobolka Gedo.Inka badan 10,000 oo hektar oo ay ku beernaayeen basal iyo xubuub kale ayaa waxyeeloobay.. Tani waxay saameyn ku yeelan doontaa habnololeedka bulshada ku teedsan wabiga iyo cuno helida Doolow iyo Beled Xaawo, iyo suuqyada kaleba, waxayna sababi kartaa sicirka oo kordha. Marka loo eego ururka beeraleyda maxalliga ah, qiyaasta qiimaha dalagaga ay fatahaadda webiga Dawa baabi'iyeen ayaa ah $ 20,000.. Roobab mahiigaan ah iyo fatahaadda webiga ayaa saameysay in kabadan 5,000 oo qof oo ku nool degmooyinka Baardheere iyo Luuq ee gobolka Gedo. Ceelal gacmeed ku yaalla magaalada Balad Xaawo ayaa daadadku ku fataheen oo laga yaabo inay wasaqeeyaan biyaha. Ceelashan waxaa biyo ahaan ugu tiirsan ilaa 20,000 qoys. Ilaa 200 qoys ayaa ku barakacay magaalada Doolow roobabkii da'ay awgood waxaana laga cabsi qabaa in barakacu uu sii kordho gaar ahaan magaalooyinka Doolow, Luuq, Buurdhuubo, Baardheere, Saakow iyo Buaale. Waxaa Doolow laga soo sheegay koror dhanka shuban biyoodka ah

Isuduwidda Howlaha Bini'aadamnimo iyo gurmadka socda

Hay'adaha bani'aadamnimada iyo maamullada maxalliga ah ayaa kor u qaadaya waxqabadyadooda waxaana ay gurmad la gaareen 157,470 oo qof. UNHCR waxa ay bixisay 780 xirmooyinka agabka aan cuntada ahayn, waxaana ay 480 xirmo ka qaybiyeen Qardho iyo 300 oo kale eey gaarsiyeen magaalada Baydhabo. Xirmooyin kale oo 5,404 ayaa diyaar ah oo loo wado meelo kala duwan oo ay ka mid yihiin Beled Weyne, Baardheerre, Kismaayo, Qardho, Baydhabo, Bardaale.

Dawlad goboleedka Puntland, kulan todobaadle ah oo ay yeelanayaan hay'adaha kala duwan ayaa laga howl geliyay magaalada Qardho. Kooxda Gargaarka Cuntada ayaa ah u dirtay dad lagu qiyaasey 40,000 oo ku nool magaalada Qardho ilaa hada. Tan waxaa ka mid ah raashinnada WFP oo laba bilood ah 2,500 oo qoys iyo lacag caddaan ah oo ka timid DRC oo gaareysa 16,200 qof. . Kooxda Hoyga, ee taageerayaan UNHCR, UNICEF, NRC, DRC, IOM, iyo mamulka Puntland, ayaa ilaa hadda 15,000 qof gaarsiiyey hoy iyo agab aan cunto ahayn. Kooxda Nafaqada oo ay taageereyso UNICEF ayaa qiyaastii 19,000 oo haween iyo carruur nugul ah gaarsiisey sahay nafaqeed. Kooxda Fayadhowrka iyo Nadaafada biyaha oo ay taageerayaan UNICEF iyo Save the Children International ayaa 48,000 qof gaarsiiyey sahay kala duwan. Kooxda Caafimaadka oo taageero ka helaya Wasaaradda Caafimaadka Puntland, WHO iyo UNFPA ayaa dawooyin kala duwan u direy Qardho.

Galmudug, xirmooyinka nadaafadda ayaa loo qaybiyay 360 qoys oo ay daadadku saameeyeen oo ku nool xirad Xarxaar ee koonfurta Gaalkaacyo. Ceel ku yaal Cabudwaaq oo biyo siin doonadoona 1,320 qoys oo ka kala socda xirooyinka barakacayaasha ee ku dhow ayaa la dib loo dayactiray. Hay'ada Mercy USA waxay bixisay adeegyo caafimaad iyo nafaqo. ku dhawaad 80 boqolkiiba qoysaska barakacay ee Bacadweyne ayaa u baahan cuno, hoy iyo gargaarka Fayadhowrka iyo Nadaafada.

Hirshabelle, hay'adaha ayaa u qaybiyey xirmooyinka nadaafada 250 qoys oo ku nool tuulada Shirkaneco gaar ahaan kuwa ka soo barakacay tuulooyinka Lebow iyo Garash. Qalabka xirmooyinka waxaa ku jira maro kaneeco iyo saabuun. 250 qoys ayaa muddo hal toddobaad ah loo dhaamiyay biyo. Hay'adda Save the Children International ayaa koloriin siineso 44 ilo biyood oo ku yaal magaalada Beled Weyne. Bil kasta ayayhalidoonaan koloriinka, iyada oo ujeedadu tahay ka hortagida daacuunka iyo COVID-19.

Koonfur Galbeed, Kooxda Fayadhowrka iyo Nadaafadda biyaha ayaau tababartey 42 shaqaale ka hortaga Shuban biyoodka iyo koloriin ku darida biya , waxaana ay sii wadaan mashaariicda la xiriirta nadaafadda biyaha iyo fayadhowrka ee Afgooye, Baraawe, Marka, Kurtunwaarey ee Shabeellaha Hoose. Kooxda ayaa dadka u qaybinaysa waxyaabo aan cuno ahayn (bustayaal, go'yaal ah,, saabuun) ilaa 12,000 oo qof oo ku nool Afgooye, 38,000 oo qof oo jooga Baydhaba iyo 13,500 oo qof oo ku nool Bardaale.

Masuuliyiinta mamulka Jubaland ayaa abaabulay gargaar cunto qeybin oo gaareyso 39 MT oo loogu talagalay 500 qoys oo ay fatahaadu saameysay. Sahay cunto ayaa la diray 5 abriil iyada oo loo marayo dhinac badda madamo ay xiranyihiin wadooyinka. Shixnadaha ayaa sidoo kale waxaa kamid ahaa 2,150 qalab dhismo oo lagu dayactirayo guryaha ay waxyeelladu soo gaartay ee jasiiradaha kudhaaa, Madhawa iyo Jula. Ilaa 10 Maajo, Mamulka Gobolka Jubbada Hoose ayaa 3,000 oo xirmooyin nadaadada ah ugu qaybiyay Magaaloyinka Kismaayo iyo Dhoobley.